GOBANNIMO

JAMA MUSSE JAMA, PISA
jmgurey@gmail.com

MEEY, 2007

Gobannimo bilaash maaha! *Waxa loo gutaa hawlo* *Waxa loo galaa meel xun* *Gocondhiyo abeesaba leh* *Iyo goodir madax buuran.*	*Gacalnimo bilaynteeda* *Garta iyo xaqdhowrkeeda* *Sharaftiyo guddoonkeeda* *Gardarrada tilmaanteeda* *Gobannimadu taa weeye.*

1. Hordhac
   1.1 Waa maxay gobannimo?
   1.2 Soohdimaha gobannimada iyo istixgelinta
   1.3 Gobannimada iyo diinta Islaamka

2. Heerarka gobannimoddoon
   2.1 Gobannimada iyo Gumaysiga
   2.2 Gobannimada iyo Boqortooyada
   2.3 Gobannimada iyo Takoorka
   2.4 Gobannimada iyo Kelitalisnimada

3. Koolkoolinta gobannimada
   3.1 Gobannimada iyo Dimuqraadiyadda
   3.2 Gobannimada iyo Xeerarka Caalamiga ah
      3.2.1 Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha 1948
      3.2.2 Heshiiska Caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda madaniga iyo siyaasiga ah, 1966
      3.2.3 Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadamiga iyo Dadwaynaha 1981

   3.3 Gobannimada iyo Dastuurka Qaranka
      3.3.1 Qodobka 32aad

4. Gobannimo jacaylka
   4.1 Gobannimada iyo Dhallinyarada
   4.2 Gobannimoddoonka cusub
   4.3 Gobannimo bilaash maaha

5. Tixraac iyo tusaalayn akhris dheeri ah

Akhisteyaasha ay waraaqdani ku socotaa waa dhallinyarada da'da yar, muhiimaddeeduna waa inay kobciso barashada iyo taageeridda Qodobka 32aad ee Dastuurka Qaranka; hordhacna u noqoto bandhigga fikradaha dahsoon ee *qarannimada*, *gobannimada*, *xilka* saaran qofka iyo *xuquuqaha* uu muwaaddinka ku leeyahay bulshadiisa dhexdeeda.

Waxay waraaqdu ku qoran tahay af fudud, waxaana la sahlay qeexaha iyo sharraxaadda ay u baahnaan lahaayeen fikradaha ay carrabawday waraaqdu. Fikradahaasi si loo lafoguro waxay u baahnaan lahaayeen erayayn iyo sharraxaad aad u qotodheer oo ku salaysan maskaxmaalnimo riddo dheer leh.

Waraaqdu waxay badhitaar u tahay is-abaabulka ay wadaan muwaadiniinta ku bahawday ururka "Somaliland Freedom of Expression Fund" ee dhawaan lagaga dhawaaqay daafaha dunida (www.somalilanfreedom.org), ururkaas oo uu qoraagu ka mid yahay.

1. Hordhac

1.1 Waa maxay gobannimo?

Gobannimo waa falidda qof uu falo arrin uu doono.

Gobannimo waa ahaanshaha xor ee qofku u madax-bannaan yahay hawl maalmeedkiisa, meesha uu damco in uu dego, iyo cidda uu doono in uu la rafiiqo. Waa xorriyadda lahaanshaha hanti gaar ahaaneed. Waa ku noolaanshaha dal aan dal kale u talinnin oo xor ah. Waa qof aan xidhnayn, oo aan jeel ku jirin, amase xadayn kale oo rabitaankiisa ka baxsani xidhaynin markaas.

Macnaha kaa ka ballaadhan ee gobannimadu leedahay waa in uu qofku u madax-bannaan yahay fikirkiisa, talada aayihiisa, awoodda rabitaankiisa, bandhigga damiciisa, kobcinta qofnimadiisa, aaminidda caqiidadiisa, carbinta maskaxdiisa, hilaadinta indheergaradnimadiisa, abaabulka dhiggiisa, sheegista iyo meel marinta taladiisa.

Haddaba haddii qofka gobannimo ku nooli uu sidaa u madax-bannaan yahay, waa maxay waxa isku haya bulsho meel ku wada nool oo mid kastaaba gobannimo ku nool yahay? Ma ay jiraa dabar xidhaya qofka gobannimada taamka ah ku nool? Waa maxay xaqa uu qofku ku leeyahay bulshadiisa, iyo xilka qofka ka saaran inuu bulshada wax u celiyo?

1.2 Soohdimaha gobannimada iyo istixgelinta

Soohdinta kowaad ee soo oodda gobannimada qofku waa halka ay ka bilaabanto gobannimada qofka kale. Taas macneheedu waxa weeye gobannimadaadu kuuma u oggolaato in aad ku xadgudubto qof kale, oo aad ka tallaabsato soohdintaas.

Gobannimada qofku waxay ku qeexantaa oo macno ku samaysaa xeerar u dejisan bulsho meel kuwada nool. Xeerarkaasi, ha ku salaysnaadaan diin, dhaqan ama bulsho caadadeede, waa kuwa aasaaska u ah wada noolaanshaha iyo jiritaanka bulshadaas. Dhawrista xeerarkaasi waa kuwa sameeya macnaha istixgelinta, nabad-ku-wada noolaanshaha, iyo jiritaanka bulshadaas, waana kuwa qeexa soohdimaha gobannimada qof kasta oo ka mid ah bulshada.

Oggolaanshaha in ay jiri karto fikrad taada ka duwan oo qof kale oo bulshadaada ka mid ahi wataa, waa furaha kowaad ee jiritaanka bulsho meel ku wada nooli u baahan tahay. Hayeeshee waxaa kale oo loo baahanyahay istixgelin. Istixgelintu waxay kaga duwan tahay oggolaanshaha fikradda dadka kale, waxay muujinaysaa wada noolaansho lagu qasban yahay iyo wax wada wadaag. Oggolaanshu wuxuu noqon karaa *"anigu fikrad tiisa ka duwan baan qabaa, waxba igama gelin tiisa, mar haddaanu aniga faraha ila soo*

galayn"; istixgelintu se waxay muujinaysaa *"waxbaa innaga dhexeeya e, inkastoo aynu kala fikrad duwannahay, aynu wadaagno waxa innaga dhexeeya"*. Istixgelintu waa furaha kowaad ee ilbaxnimada bulsho meel kuwada nooli higsan karto.

Sida uu muwaaddinku xaq ugu leeyahay dawladdiisa iyo bulshadiisa inay sugaan gobannimadiisa, oo dhowraan xorriyaddiisa, ayaa isagana xil uga saaran yahay inuu ilaashado oo dhawro xeerarka wada-noolaanshaha iyo isxilqaanka

1.3 Gobannimada iyo diinta Islaamka

Ujeeddooyinka Illaahay u soo dejiyey in Diinta Islaamku xaqiijiso ee shanta ah, afar kamid ahi waxay dammaanad qaadayaan gobannimada qofka aadanaha ah. Shantaa oo loo yaqaan "Maqaasidu Shariica" oo ah shanta Diinta Islaamku ilaaliso ayaa ah *Tawxiidka, Nafta, Maalka, Sharafta (cirdiga) iyo Caqliga*. Sidaa darteed waxaynu odhan karnaa diinta Islaamka waa diin u taagan gobannimada qofka aadanaha ah. Iyadoo caalamku ku jiro wixii loo yaqaannay "xiliyadii mugdiga ahaa" ayuu Qur'aanku dammaanad qaaday gobannimada shakhsiga midda ugu mudan oo ah xorriyadda iimaanka *"Qasab maaha Diinta geliddeedu, Hanuunku (Iimaanku) waa ka soocanyahay gaalnimada, ruuxiise diida Daaquud (shaydaan iyo xume fare wixii ah) oo rumeeya Eebbe wuxuu qabsaday xadhig sugan oo adag (Islaamka) oo aan go'ayn, Eebbana waa maqle og."* Q.K, suuradda 2aad, aayadda 256aad[1].

Gobannimadu waa lahaansho aasaasi ah marka loo eego diinta Islaamka. Ilaahay (Isagaa Korreeye ahe) wuxuu Qur'aanka ku sheegay in Uu abuuray qof kastaa isaga oo xor ah. Waliba Wuu ugu mannasheegtay dadka xornimada uu ugu deeqay. Diinta Islaamku waxay inoo sheegaysaa in qofkastaa xor yahay, oo Ilaahay ka yeelay xor, Uguna deeqay maskax uu wax ku garto, oo go'aankiisa u gaarka ah qofku ku gaadho. Qofka waxa uu Ilaahay u kala sheegay jidka toosan iyo kan qallooca.

Xornimadaa buuxda ee Ilaahay ku mannaystay qofka waa ta qofka ka yeelaysa in uu ku noolaado gobannimo buuxda; waana ta ka xidhaysa gefka uu ka geli karo gobannimada qof ka kale. Diintu waa xeerar iyo sharci loo baahanyahay in la raaco, sidaa darteed waa soohdin ka mid ah soohdimaha aynu kor kusoo sheegnay ee xadeeya gobannimada qofka.

Xornimada Ilaahay ugu deeqay qofka waa mas'uuliyad gaar ah oo uu u saaray; uuna ugu afeef dhigtay in uu kula xisaabtami doono, oo qofkii xorriyaddaa la siiyey si wanaagsan ugu dhaqma, ee raaca waddadii saxa loogu tilmaamay, lagu abaal marin doono. Haddii uu qofku xorriyaddaas la

[1] *Kitaabka Qur'aanka Kariimka*, Suuradda 2aad, 'al-baqrah' (Bogga 54). Turjumaadda Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, Al-Madina Al-Munawarah, 1412 H.

siiyey si qalad ah ugu dhaqmo, oo waddadii qallooca loogu sheegay ee looga digey raacona, lagu ciqaabi doono.

Aayadaha 8aad, 9aad iyo 10aad ee suuradda 90aad, wuxuu Ilaahay Ugu mannosheeganayaa qofka oo Uu leeyahay *"miyaanaan u yeelin (qofka) laba indhood (8); iyo carrab iyo laba dibnood (9); oo miyaanaan u kala caddayn labada jid (jidka saxa ah iyo kan qaladka ah; khayrka iyo sharka)".* Mar kale Ilaahay wuxuu ku leeyahay aayadaha 2aad iyo 3aad ee suuradda 76aad, *"waxaannu (qofka) u hadiyeynay, arag iyo maqal, waxaana aanu tusnay Jidka (saxa ah); waxayna noqdeen mid shukriya (oo mahadiya) iyo mid gaalnimo bidey"*[2]. Mannasheegadaasi waxa uu Ilaahay ugu ballanqaadayaa abaalmarin uu ku abaalmarin doono xorriyaddaa uu siiyey qofka.

Sidaa daraadeed diinta Islaamku waxay meel marag maddoon ah dhigtay qofka gobannimadiisa iyo in aan cidina gef u gaysan karin.

2. Heerarka gobannimoddoon

2.1 Gobannimada iyo Gumaysiga

Gumaysiga, oo macnaha uu halkan ugu jiraa ay tahay marka dawlad debedda ka timi ummad kale ku duusho oo qabsato, oo madax-bannaanidooda xaddido, waxaa la dagaallama qofkii doonaya dawladnimo xor ah oo ka talisa aayaha ummaddiisa. Dawladdaas oo ah mid ka samaysanta ummadda dhexdeeda.

Gobannimada ay maqnaasheheeda dareento ummad ku hoos jirta Gumaysi waa waji ka mid ah gobannimodoonnimada, waana ta si fudud loo wada dareemo baahideeda; had iyo jeerna ummadda u dagaallamaysa inay hesho gobannimadeedu kuma kala qaybsanto rabitaanka doonistaas. Sidaa darteed way fududahay in la isla fahmo, sina loo wada doono, gobannimada laga dhicinayo Gumaysiga. Waa tii uu Cabdillaahi Suldaan Maxamed "Timacadde" lahaa[3]:

> *Uma tudho gumaysigu ninkaan, tebin xaqiisiiye,*
> *Isticmaarku nimuu toos yidhaa, tigan Xuseenowe,*
> *Tawaab baa aqbala muuminkii, taagga jari laaye,*
> *Tiriiggaa Afrika u baxaa, Yurub ka taahdaaye,*
> *Shan kastooy ku wada taagsadeen taababkaw go'aye,*
> *Nin tuurliyo nin toos wax u lahaa, saarnay tuhunkiiye,*
> *Tebis naaxay baynoo dhalaye, tuugga ka ilaasha.*

[2] Kitaabka Qur'aanka Kariimka, Suuradda 76aad, 'al-insaan' (Bogga 816). Suuradda 90aad 'al-balad' (Bogga 848). Turjumaadda Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, Al-Madina Al-Munawarah, 1412 H.

[3] Diiwaanka Maansada Cabdillaahi Suldaan Maxamed (Timacadde), Boobe Yuusuf Ducaale, Addisababa 2006, Bogga 106.

Bulshadeennu waxay macnaha gobannimoddoon la xidhiidhsiisay iska erigii gumaysiga Reer Galbeedka ee laba qarni ka hor kusoo duulay e qabsaday ummaddeenna. Gobannimoddoon, amase gobannimo u dirir, waa qofkii u dagaallamay inuu helo dowlad madax-bannaan oo aayaha ummaddeenna ka talisa, iyadoon Reer Galbeedku go'aamin taladaas.

Gobannimaduse way ka ballaadhan tahay madax-bannaanida siyaasadeed. Waxaa jira dalal badan oo aan dadkiisa dawlad kale gumaysannin, haddana aanu dadkeedu u madax-bannaanayn xorriyaddii Ilaahay ku mannaysatay. Waxa jira dalal madax-bannaan haddana siyaasadda maamulkooda laga hoggaamiyo meel kale; waxaa jira gumaysi dhaqaale, mid dhaqan iyo mid dhaqaale.

2.2. Gobannimada iyo Boqortooyada

Boqortooyadu waxay ku salaysantahay kala sarrayn aad u qallooc badan oo qofka reer boqor ahi ka mudan yahay qofka kale. Inta aan xaqdarrooyinka kale ee ay keento boqortooyadu looba gelin, taas baa meel dhigaysa in gobanimmada qaarkeed lagu gafayo marka la oggolaado in boqortooyo wax lagu xukumo.

Gobannimoddoonkii ka soo horjeestay boqortooyada, laga soo bilaabo Kacaankii Faransiiska, waxa uu rabitaankoodu ku salaysnaa in la dhiso dawlad ummaddu leedahay oo ay iska dhexdoorato cid wakiil u ah (baarlamaan), ciddaas oo u dajisa xeerar lagu kala hagmo. Haddii ciddaa la doortay ay kasoo bixiwaydo xilkii loo igmadayna, ay ummaddu kala noqoto wakiilashada.

Boqortooyadu arrinkaas ma oggolaato, waana sababta ay gobannimaddoonka boqortooyada kasoo horjeedaa, ugu dagaallamaan in laga hoos baxo, ama la xaddido, awoodaha ay boqorradu leeyihiin. Gobannimada noocan oo kale ahi way fududdahay in la isku raaco rabitaankeeda oo si loo wada fahmo.

2.3. Gobannimada iyo Takoorka

Soocidda wadata yasid iyo hoos-u-dhig shaqsi ama koox ka mid ah bulshada meel kuwada nooli, waa takoorka lagu takooro qof midabkiisa, asalkiisa, jisniyaddiisa, diinta uu aaminsan yahay ama wax kasta oo kale oo qofkaas loogu hoos dhigayo sharaftiisa, xaqiisa iyo xurmadiisa, laguna gefayo gobannimadiisa uu Ilaahay ku mannaystay.

Takooristu waxay ka mid tahay gefafka ugu waawayn ee bulshada casriga ah ku hayso gobannimada shaqsiga. Inkasta oo aanay ummaddeennu soo arag takooridda midabka amase diinta, haddana waxaa ragaadiyey yasid aad iyo aad u fool xun, iyo tacaddi xaaraannimo ku salaysan, oo lagu sababeeyay

qabiil iyo isir laga soo jeedo. Waa bahalnimo yaxyax badan leh oo u gaar ah ummaddeenna, had iyo jeerna aanay gobannimoddoonkii soo maray bulshadu aanay si feejignaan leh u wada dhaadin oo aanay ka dhiidhiyin. Waa hayb-sooca gumaysiga ah ee qaybo dhan oo bulshadeenna ka mid ah, oo magac qabiil la siiyey, lagu hayb-sooco oo lagu cunsuriyadeeyo ummaddaas.

Gobannimaddoonka arrinkan ka dagaallamaa waa ka af iyo addinba kaga qayb qaata isu taagista sinnaanshaha ummadda iyada oo aan qofna sharaftiisa iyo gobannimadiisa lagu xad gudbaynin iyada oo lagu marmarsoonayo takooris iyo hayb-sooc kale. Yuusuf Cismaan Cabdille "Shaacir", isagoo ka walaacsan sida uu maansayahankeennu arrinkan u ilduufay, kuna dhiirrigalinaya in dib loogu noqdo, waa tuu ku ducaysanayay[4]:

Bulshadana mid debecdoo
Daaddahaysa samahoo
Dil dillaanka qoyskiyo
Durkintiyo fogeyntiyo
Kala dookha neceboo
Damiirkeedu wacan yahay
Daayinow na solansii.

Waxaa kale oo qiime badan gabayga cusub ee uu Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi" uu tiriyey 1/5/2007 ee la magacbaxay "Dhulgariir", taasoo uu ku dardaarwerinayo sida aan jid ugu furnayn yasidda hayb-sooca ah.

2.4. Gobannimada iyo Kelitalisnimada

Kelitalisnimadu had iyo jeer waxay ku timaaddaa, oo marka hore dadku ku oggolaadaa, iyadoo maamulkeeda lagaga baxo dhibaato culus. Tusaale ahaan Afgembi ay keenaan askar iyaga oo xukunka kula wareega xoog, dadkuna ku raaco maaddaama xaaladda markaa lagu jiraa aanay fiicnayn; ama kacdoon dadwayne oo guul dabadeed maamulkooda si aan dabar lahayn ugu oggolaada inay ku hoggaamiyaan qaar iyaga ka mid ah. Xanuunkaa ay bulshadu ka baxday awgii ayay marka hore ugu dulqaadataa in dawladda kelitaliska ahi ku xag gudubto gobannimada qofka, marka danbena meel ay kasoo qabato ayay waydaa oo dawladda kelitaliska ahi way ku awoodaystaa. Tusaale waxaa inoo noqon kara dawladdii Maxamed Siyaad Barre[5], oo ku timi

[4] Eeg maansada *"Dulmanaha la quudhsaday"*. Buugga *"Nabadshe, Maansada Nabadaynta iyo Milicsi suugaaneed"*, Yuusuf Cismaan Cabdille "Shaacir". Qalinkii Jaamac Yaasiin Nuux "Suldaan", London 2005. Bogga 197aad.

[5] Kaligiitaliye Maxamed Siyaad Barre oo lagu naanaysi jirey "Afweyne" wuxuu inqilaab ku qabsaday dalkii Jamhuuriyadda Soomaaliya la odhan jirey 21kii Oktoober 1969kii. Dawladdiisii soddonka sannadood xukumaysay waddanka waxay u gaysatay halaag iyo dhibaato farabadan shacbigii markii hore soo dhaweeyey ee ku taageerey wax kasta oo uu doonay in uu sameeyo. Bilowgii 1991ka ayaa xoog lagaga saaray waddanka, waxaana uu ku dhintay Lagos (Nayjeeriya) 2dii Jeenawari 1995 isagoo debedyaal ah.

afgenbi, laguna soo dhaweeyey si niyad ah markii hore, waayo bulshada ayaa saluugsanayd xaaladdii markaas lagu jirey. Tusaale kale wax ah dowladihii xilka kala wareegay gumaysigii Afrika haystay ee ka faa'iidaystay jibbadii dadka u haysay xornimada la helay, kuna noqday gafanne kale oo iyaga dhiiggooda jaqa.

Xeerarka u yaalla bulsho ayay jabisaa dawladda kelitaliska ahi si ay uga hor tagto beddelaadda ku imankarta rabitaanka ummadda maamulka u dhiibatay. Xeerarka ugu horreeya ee ay jabisana waxaa ka mid ah in ay ku gefto gobannimada qofka ee gaarka ah. Waxay cabbudhisaa sheegista fikirka, ka hadalka qaladaadka ay gasho, waxaanay si sharcidarro ah uga qaaddaa xorriyadda qof kasta ama koox kasta oo ay u aragto inay halis ku noqonayso kusii waaritaanka hoggaanka. Tallaabada ugu culus ee ay dawladi qaaddaa si ay u caddaysato kelitalisnimo, waa in ay xidho ama disho ciddii kula muranta aaya ka talinta ummadda. Waa astaamihii aynu kusoo aragnay dawladdii Maxamed Siyaad Barre.

Haddaba gobannimoddoonka u halgama ummadda si uu uga dhiciyo kelitalis wuxuu la kulmaa culays ka badan ka ay la kulmaan gobannimoddoonka la diriraaya boqortooyo ama gumaysi. Kelitalisku waa waax ka mid ah ummadda, oo aan astaan gaar ah lahayn marka hore, islamarkaana kaa awood badan, sidaa darteed qofka gobannimo u dirirka ah way adagtahay inuu ka dhaadhiciyo ummadda inteeda kale inay la saftaan oo la dagaallamaan kelitaliska.

Af iyo addin loolama kala hadho marka uu kelitalisku maroorsado ee afduubo rabitaanka dadwaynaha. Abwaannada oo had iyo jeer meel aragtida muuqata ka fog kala hadla ummadda, waxay u dardaarweriyaan oo hoga tusaaleeyaan kelitaliska laftiisa, ugana digaan dhibaatada ku iman karta. Wuxuu yidhi Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi", maansadiisii "Bulsho 1981"[6]:

Bulshoy adigaa milga leh
Ninkii boojimo ku yidhi
Shalaad barataannu nidhi
Bayluulida haw furfurin
Bariidana kaama geyo.

Ninkii ballankaaga qaaday
Ka baaqday xilkaad u dhiibtay
Ka baydhay ujeedadaada
Ku boobay adoo sabool ah
Ku wiirsaday baaba'aaga
Adoo bogan waayey taada
Ninkii u buseelay raaxo
Huwaday bulbushii libaaxa
Buruudkiyo shaashka qaatay

[6] *Halkahaleel*, Maxamed Baashe X Xasan, London 2004, Bashe Publications, Bogga 82.

U booday cirkaa dusheenna
Bilkeeday laboontidiisa
Buurtuu koray waarin mayso
Heddiisana baajin mayso
Kub iyo bawduu ka jabi.

Gobannimoddoonka la dagaallama kelitalisku wuxuu soo maraa dhibaatooyinka ugu culus; waxaana had iyo jeer ay isu rogtaa xaaladdu in dagaal la iskaga horyimaaddo, oo naf iyo maalba loo huro gobannimada.

3. Koolkoolinta gobannimada

Gobannimadu waa deeq ilaahay bixiyo, hayeeshee had iyo jeer baylah u ah in lagu gefo. Ummadda waxa kala xadeeyaa waa sharci, sharcigaas oo shaqsi kasta oo bulshada ka mid ahi u hoggaansamo, haddii uu u hoggaansami waayana uu ku mutaysto abaalmarin uu kaga waantoobo qaladkiisa. Qofka muwaadinka ahi, sidaa darteed, wuxuu gobannimadiisa la ilaashadaa dhiggiisa, kulana noolaadaa wanaag isagoo niyadda ku haya in hadduu ku gefo qof kale, uu jiro sharci ka aargoynayaa.

Qofku maamulka ah ee shaqadiisu tahay inuu guto wixii loo wakiishay, oo ay ka mid tahay inuu dhiso, kaabo, dhammaystiro oo ilaaliyo gobannimada ummadda uu u talinaayo, waxaa isna xidha sharciga. Waa in aanu ku gefin awoodda lagu ammaanaystay oo aanu si sharciga ka baxsan ugu takri falin. Haddaba qofka mas'uulka ah waxaa jir saddex arrimood oo xidha si uu xilkiisa u guto, una kasbado rabitaanka ummadda aamintay:

- ✓ diin: in qofka mas'uulka ahi cabsi Eebbe awgii, ogaado xilka lagu ammaanaystay inta uu le'egyahay, una tudho aakhiradiisa; mas'uuliyadda loo dhiibayna uga faa'iidaysto in uu ugu dhawaado Eebbe.

- ✓ damiir kale oo macnawi ah: waxaa lagala yimaaddaa barbaarinta guriga oo qofku wuxuu ogaadaa in mas'uulnimada ay ku jirto inaan cidna lagu gefin; hadduu gef kaa dhacana in la bixiyo raaligelin oo la waydiisto denbidhaaf; in dhibbanaha la is garabtaago; mas'uulkani waa ka doona in uu kaga tago ummaddiisa magac sharaf leh oo lagu xusuusto.

- ✓ dan gaar ah: waxaa lagala yimaaddaa han gaar ah oo uu qofku doono in uu isagu wax maamulo, iyo dan gaar ah oo uu markaa leeyahay. Waxaase xadeeya cabsi uu ka qabo in bulshadu la xisaabtanto oo ugu yaraan ay mar kale waxba u dhiiban waydo, haddii aanayba sharafta ka xayuubin.

Waxaa marag maddoon ah in haddii saddexdaa midina uu xidhi waayo, uu mas'uulkastaa ka farabaxsado xakamaha iyo xuduudaha gobannimada; isla

markaana in uu dhawro gobannimada dadkiisa daaye, isaga uu noqdo ka gefka ugu horreeya u gaysta ummaddiisa.

Haddaba yaa looga baahan yahay inay koolkooliyaan gobannimada, oo ay ka ilaaliyaan baylahda kaga iman karta shaqsiga, bulshada iyo hoggaanka ummadda intaba? Waa maxayse xeerarka ka yaallaa?

3.1. Gobannimada iyo Dimuqraadiyadda

Dawladnimada casriga ah ee maamulkeedu ku yimaaddo rabitaanka shacbigeeda, awoodda ugu sarraysa waxaa iska leh dadwaynaha. Waxaa is shabbaha oo marka danbana isla falgala, isku waxna noqda, rabitaanka maamulka xilka loo dhiibay iyo danta ummadda ku aamintay xilkaas. Maamulku waa shaqaale loo igmaday inay baylah tiraan baahiyaha ummadda, isla markaana isku dubbaridaan habka wada noolaanshaha ee bulshada, iyagoo u maraya xeerar dhigaal ah oo la isku ogyahay. Ummaddu waxay xaq u leedahay in ay markasta si talowadaag ah ugala noqoto kalsoonida maamulka, haddii ay ku dhaliilaan in maamulku kasoo bixiwaayay xilkii lagu aaminay. Kala noqoshada kalsoonidu waxay soo martaa xeer iyo hab nabada oo la isla ogyahay, tusaale ahaan in marka xilligii loo cayimay ka dhammaado, aan markale loo cusboonaysiinin xilka e lagu beddelo maamul kale oo hawsha sii wada.

Dawlad dimuqraaddi ah astaamaha lagu garto waxaa ka mid ah inay dhawrto gobannimada ummadda xilka u dhiibatay, oo ay sugto in aan qofna lagu gefin gobannimadiisa, oo aanu qof ama koox kale ku gefin. In ay dhawrto iska daaye, hadday dawladda lafteedu ku keento gef gobannimada muwaadinka u dhiibtay xilka, waxay dawladdaasi luminaysaa kalsoonidii muwaaddinka. Taasi waa arrin aasaasi ah oo beeninaya dimuqraaddinimada dowlad kasta oo ku kacda gef loo gaysto gobannimada muwaaddinka.

Dawladda dimuqraadiga ah waxaa looga baahanyahay in ay meel cad, oo marag-maddoon ah dhigto gobannimada aasaasiga ah ee uu qofku xaq u leeyahay: qofku wuxuu xaq u leeyahay tusaale ahaan inuu, keli ahaan ama isaga oo dad kale weheliyaan, soo bandhigo meel fagaare ah, ama meel gaar u ahba, diintiisa iyo waxa uu aaminsan yahay, kuna muujinayo xagga waxbarid, ku dhaqanka, caabudid iyo cibaadaysi. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xornimo xagga ra'yiga iyo hadalka; wuxuu kale xaq u leeyahay inaan lagu handadin, laguna fara gelin ra'yigiisa. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado, helo, oo isna sii dhiibo warar iyo fikrado. Qofku wuxuu u leeyahay xaq in uu isticmaalo qalab kasta oo war baahin ah iyaga oo aan loo eegin ama lagu xadayn wax soohdima ah. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu si xor ah ugu kala socdaalo waddankiisa gudihiisa, markuu doono ka baxo kuna soo noqdo. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu samaysto, ku biiro, ama abaabulo dhiggiis, sidii ay u samaysan lahaayeen urur hindisihiisu aanu ka hor iman shuruucda waddanka u yaalla.

Gobannimada qofka waxaa ka mid ah inuu qoraal kusoo gudbiyo fikirkiisa isagoon ka baqan in dawladdu aano u raacdo, amase faafreeb ku samayso wuxuu damacsanaa inuu ummadda la wadaago. Gobannimada waxaa ka mid ah in qofku iskuul ka uu doorto uu galo, carruurtiisana u dooro iskuulka ay dhiganayaan, iyagoo raacaya shuruucda waddanka u yaalla. Tusaale ahaan haddii dawladdu gacanta ku hayso iskuullada hoose, isla markaana waddanka sharciga u yaallaa ka dhigayo qasab iskuullada hoose, markaa waalidku waa inay maraan sharciga oo carruurtooda mariyaan iskuul sharciga waddanku u aqoonsanyahay kaafi.

Waddada kaliya ee u furan in dawladi soo faro galiso arrimahaa kor ku xusani waa iyadoo qofku ka tallaabsaday soohdimihii gobannimadiisa, kuna xad gudbay gobanimmada qof kale, ama jabiyay sharci dalka u yaalla; amase falkiisu uu halis ku yahay ammaanka, xasilloonida iyo wada noolaanshaha ummadda. Wixii danta guud ka hor-imanaya, dawladdu iyadoo u maraysa waddo sharci ah, waxay u joojisaa si sharciga waafaqsan.

3.2. Gobannimada iyo Xeerarka Caalamiga ah

Waxaa jira baaqyo iyo heshiisyo caalami ah oo adduunku isku raacay, kuwaasoo caddaynaya xuquuqaha aasaasiga ah ee qofka iyo gobannimada uu Ilaahay ku mannaystay qofka ee aan sina loogu xad gudbi karin. Waxaa ka mid ah kuwan:

3.2.1. Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha 1948.

Baaqan waxaa Golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay soo saareen, oo ansixiyeen, 10kii Diiseember ee 1948kii. Qodobkiisa 19aad wuxuu si gaar ah uga hadlayaa Gobannimada Ra'yi dhiibashada, kuna darayaa xuquuqaha aasaasiga ah ee qofka.

Qodobka 19aad.
Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay xorriyadda fikradihiisa iyo ra'yi dhiibashada. Waxa xaqan ku lammaan xoriyadda fikrad gaadhista oo aan cidina fara gelin, iyo raadsashada, helista iyo dhiibashada fikradaha iyo wararka baahin kasta lagu fidiyo oo aan soohdimo ku ekayn.

3.2.2. Xeerka Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda, 1966.

Xeerkan waxaa la soo bandhigay 16kii Diiseember 1966kii, waxaanu dhaqangalay 23kii Maarij 1976kii. Qodobkiisa 19aad wuxuu si gaar ah uga hadlayaa Gobannimada Ra'yi dhiibashada, kuna darayaa xuquuqaha aasaasiga ah ee muwaadinka.

Qodobka 19aad
1. *Qof kasta wuxu xaq u leeyahay in uu fikradihiisa gaadho iyadoon cidina farogelin.*

2. *Qof kasta wuxu xaq u leeyahay xorriyada ra'yi dhiibashada. Waxa xaqan ku lammaan xorriyadda raadsashada, helista iyo dhiibashada fikradaha iyo wararka caynkasta ah, oo aan soohdimo ku ekayn, oo ah habka cod, ama qoraal.ama daabacaad, ama si fanka ah, ama lagu fidiyey baahin kale oo qofku doorbiday.*
3. *Isticmaalka xuquuqda ku xusan farqadda 2aad ee qodobkan waxaa la socda waajibaad iyo masuuliyad gaar ah. Kolkaas xuquuqdaas si xusan waa loo xaddidikaraa, laakiin xaddideyntani waxay ahaaneysaa oo keliya mid xeer kusoo baxday oo ah lagama-maarmaan loogu baahanyahay:*
    1. *Xushmeynta xuquuqda iyo sumcada dadka kale;*
    2. *Ilaalinta nabadda qaranka ama xasilloonida guud, ama sixidda anshaxa dadweynaha.*

3.2.3 Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadamiga iyo Dadweynaha 1981.

Qodobka 9aad ee Axdigani wuxuu mar kale meel marinayaa gobannimada fikrad faafinta iyo war doonashada.

Qodobka 9aad

1. *Qof kasta wuxu xaq u leeyahay in uu helo wararka.*
2. *Qof kasta wuxu xaq u leeyahay in uu dhiibto ama faafiyo fikraddiisa si sharciga waafaqsan.*

Dhammaan xeerarkaa iyo baaqyadaa caalamiga ahi waxay caddaynayaan, islamarkaana kafaalaqaadayaan gobannimada qofka.

3.3. Gobannimada iyo Dastuurka Qaranka

Marka laga yimaaddo xeerarka iyo baaqyada caalamiga ah ee dawlad kasta xidhaya, kuna soo dabbaalaya inay ilaaliso gobannimada qofka, gaar ahaan gobannimada ra'yi dhiibashada, haddana si cad ayay markale ugu qeexan tahay Distoorka Qaranka.

Qaybta kowaad, Xubinta saddexaad ee Dastuurka qaranku waxay si marag maddoon ah u caddaynaysaa Xuquuqda iyo Xornimada muwaadinka. Qodobbada 21, 23, 25, 31, 32 iyo 33 waxay si buuxda u dammaanad qaadayaan, gaar ahaan, gobannimada qofka. Waxaynu tusaale usoo qaadanaynaa qodobka 32aad oo ka hadlaya gobannimada fikirka iyo ra'yi dhiibashada.

3.3.1. Qodobka 32aad

Qodobka 32aad ee Dastuurka Qaranku wuxuu dammaanad qaadayaa gobannimo dhammays ah oo qofkasta oo muwaaddin ah u sugnaatay. Qodobkaas oo lagu tibaaxay *"Xorriyadda Bannaanbaxa, Ra'yi-dhiibashada, Saxaafadda iyo Warbaahinta kale"* wuxuu dhigayaa:

1. Muwaadin kasta waxa uu xor u yahay in uu ra'yigiisa ku bandhigo qoraal, hadal, muuqaal, suugaan ama qaab kale oo xeerka waafaqsan.

2. Muwaadin kasta wuxuu xor u yahay inuu abaabulo kana qayb qaato, kulan ama bannaanbax nabadeed oo xeerka waafaqsan.

3. Saxaafadda iyo warbaahinta kale waxay ka mid yihiin xorriyaadka asaasiga ah ee ra'yi-dhiibashada, waxayna leeyihiin madax-bannaanidooda; way reebban tahay tallaabo kasta oo lagu cabbudhinayo; hawshoodana xeer baa nidaaminaya.

4. Gobannimo jacaylka

4.1. Gobannimada iyo Dhallinyarada

Xaqa uu qofku ku leeyahay bulshada dhexdeeda, iyo xilka qofka ka saaran in uu dhowro ixtiraamka xeerarka u yaalla bulshadu waa laba arrimood oo aan kala maarmin.

Qofka dhallinyarada ah waxa ka saaran xil dheeri ah u feejignaanta gobannimada marka loo eego qofka da'da weyn. Adduunka xoogga wax ka beddelaa waa ka dhallinyarada, qofkuna xilliga uu ugu xoog badan yahay si uu saamayn ugu yeelan karo mustaqbalkiisa, waa inta uu dhallinyarada yahay.

Gobannimo jacaylku waa wax ku beeran maskax kasta oo dhallinyar oo caafimaad qabta. Dhaqankeennu wuxuu u xagliyaa inuu talada meel cidla ah ka dhigo qofka dhallinyarada ah, ayna adkaato sidii uu ra'yiga dhallinyaradu uga dhexmuuqan lahaa madasha go'aanka lagu gaadhayo. Dhallinyaradu waa inay arrinkaas wax ka beddeshaa, oo ku dhiirrataa in codkooda la maqlo, oo laga maqlo madasha lagu go'aansanayo aayaha bulshada iyo mustaqbalka dhallinyarada laftooda.

Qofka dhallinyarada ahi uma daalo sida qofka da’da weyni u daalo nolosha caadiga ah. Bulshaduna sideedaba daalka kama soo hadho. Waatuu Cabdillaahi Cawed Cige[7] lahaa:

Bulshooy ruux daalayaa
Dayaxa uma sahan tagoo
Daruuraha uma kacoo
Mahaybsado duul kaloo
Cilmiga kumasii durkoo
Dawada naafada kabtiyo
Wixii diihaal dhayiyo

[7] Maansada *“Dedaal baan kugu ogahay”*, Cabdillaahi Cawed Cige, 1996.

Waxay naftu doonto'iyo
Wixii aadmigu dersiyo
Wixii deyr adag galaba
Fadhiga kumasoo dejoo
Dedaalkiisaan jacnayn.

Bulshooy iga daa walaac
Dulmiga aad weheshatiyo
Damiinnada kuu kaciyo
Ka waantow daw dhacoo
Dedaal baa kula gudboon.

Gobannimada koolkoolinteedu waxay u baahantahay tamar iyo feejignaan badan. Tamartaasina waxay ku jirtaa oo kaliya dhallinyarada. Dedaal baa qofka dhallinyarada ah la gudboon. Hadday dhallinyaradu ka seexato kaalintaas, gobannimada waxaa ku imanaya baylah. Hadday baylihi timmaaddana wadeeco ayay halis u tahay.

4.2. Gobannimoddoonka cusub

Gobannimadu bilaash ma aha. Laguma helin fudayd e waxaa loo hurey naf iyo maal, waxaana loo soo maray dagaal qadhaadh iyo dhibaato, heerkay doonaanba ha soo mareene. Gobannimadoonkii ka hantiyey sharaftiisa Gumaysiga, Boqortooyada, Kaligiitaliska intuba waxay u hureen naf iyo maal wixii ay karayeen, hantida gobannimadaasna waxaa ku daatay inta badan dhiig.

Sidaas oo kale ayaanay gobannimadu u ahayn bilaash oo aan lagu haysan karin fudayd. Waa in soo joogto ah loo daryeelaa, loogu feejignaadaa, oo loogu huraa maal iyo maskaxba si aanay markale qasab u noqon in nafna loo huraa. Gobannimo jacalyka iyo koolkoolinta gobannimadu waa horseedka ilbaxnimada cusub iyo abqaalidda nabad waarta oo bulsho meel ku wada nooli ku negaato. Sidaa darteed, gobannimodoonka casriga ahi waa qofka u feejignaada kobcinta iyo dhisidda aasaaska ummadda uu ku dhex nool yahay.

Gobannimaddoonka cusubi waa indheergaradka aad ugu fiirsada waxa hareerihiisa ka dhacaya, dhugasha hoosena u leh gef kasta oo lagula kaco xorriyadda aasaasiga ah ee qof ka mid ah bulshada uu ku dhex nool yahay.

Gobannimaddoonka cusubi waa qofka ka yaqyaqsooda in agtiisa lagu yaso qof kale oo dhiggiisa ah; waa ka aan oggolaanin in isaga la yaso oo la hayb-sooco; waa ka garab istaaga ee hormuud ka noqda sidii looga hortegi lahaa ee lagu cidhib-tiri lahaa ayaan darrada hayb-sooca.

Xoogga Gobannimodoonka cusubi waa dhallinyarada doonaysa ee diyaarka u ah inay wax ku darsadaan taariikhda jiritaankooda. Waa dhallinyarada

aaminsan e ku qanacsan in ay timaaddadoodu wax badan ka beddeli karaan haddii ay u dadaalaan, oo aanay ku hallaynin inta ka da'da weyn ee maanta gacanta ku haysa. Xooggaas waxaa looga baahanyahay in aanay mustaqbalkooda u daba fadhiisannin duqayda e, ay codkooda muujiyaan, oo ku darsadaan baal ka mid ah baalasha taariikhda maanta qormaysa.

4.3. Gobannimo bilaash maaha

1. Gobannimo bilaash maaha
2. Cidna gaar isuma siiso
3. Gacalnimo ma lagu keeno
4. Afgobaadsi iyo weedh san
5. Gacansaar kumay imanin.

6. Guullow Allahayow dhe
7. Gallad weeye aad bixiso
8. Cidkalena ma goynayso
9. Gabannimo adaa keenay
10. Gob adaa innaga yeelay.

11. Guullow Allahayow dhe
12. Qof kastoo geyigan jooga
13. Gashi weeye aad siisey
14. Hadda maaha gobolaysi
15. Gobannimo qabiil maaha.

16. Godob iyo wax daran maaha
17. Ku gumee dhiggaa maaha
18. Ka gufee codkana maaha
19. Iga daba guclee maaha
20. Kaligay gadhwado maaha

21. Gobannimadu xeer weeye
22. Gefkeeduna xumaan weeye
23. Gobo' dhiig leh oo qubatay
24. Goblan iyo jab baa raaca
25. Gocasho iyo xanuun badan leh.

26. Gobannimo bilaash maaha!
27. Waxa loo gutaa hawlo
28. Waxa loo galaa meel xun
29. Gocondhiyo abeesaba leh
30. Iyo goodir madax buuran.

31. Gacalnimo bilaynteeda
32. Garta iyo xaqdhowrkeeda
33. Sharaftiyo guddoonkeeda
34. Gardarrada tilmaanteeda

35. Gobannimadu taa weeye.

5. Tixraac iyo tusaalayn akhris dheeri ah

Diinta Islaamka iyo Gobannimada

- Kitaabka Qur'aanka Kariimka, Turjumaadda Sheekh Maxamuud Maxamed Cabdi, Al-Madina Al-Munawarah, 1412 H.

Suugaanta iyo Gobannimada

- Boobe Yuusuf Ducaale, *Diiwaanka Maansada Cabdillaahi Suldaan Maxamed (Timacadde)*, Addisababa, 2006.
- Maxamed Baashe X Xasan, *Halkahaleel*, London 2004, Bashe Publications.
- Jaamac Yaasiin Nuux "Suldaan", *Nabadshe, Maansada Nabadaynta iyo Milicsi suugaaneed*, *Yuusuf Cismaan Cabdille "Shaacir"*. London 2005.
- Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi", Gabayga *"Dhulgariir",* Hargeysa, 1/5/2007.

Silsiladda maansooyinka Ga'layda ee Gobannimo

Ururka Soomaaliland Forum waxaa dhexdiisa ka bilaabantay suugaan kale oo xidhiidh la leh Gobannimada, oo ku halqabsanaysa maansada "Gobannimo bilaash maaha!"

Ilaa hadda waxaa ka qayb galay 8 qof oo kala deggan 7da dal ee Talyaaniga, Kiiniya, Iswiidhen, Maraykanka, Sucuudi Areebiya, Imaaraadka Carabta iyo Ingiriiska, tiriyeyna 13 maanso ilaa maanta:

1[AAD]: *"Gobannimo bilaash maaha!",*
Jama Musse Jama, Pisa, Italy, 4/4/2007
2[AAD]: *"Googgaa Siciidoow",*
Ismaaciil Cawad, Nairobi, Kenya, 22/4/2007
3[AAD]: *"Ila saafa gobannimo",*
Jama Musse Jama, Pisa, Italy, 24/4/2007
4[AAD]: *"Gobannimooy maxaad tahay?",*
Sayid Maxamed Yuusuf "Dhegey", Stockholm, Sweden, 25/4/2007
5[AAD]: *"Googgaalahaagii",*
Siciid Saleebaan, MN, USA, 26/4/2007
6[AAD]: *"Inta fahantay gobannimo",*
Axmed Xuseen Ismaaciil, Jeddah, S.A., 26/4/2007
7[AAD]: *"Garasho Eebbe",*
Ismaaciil Cawad, Nairobi, Kenya, 27/4/2007
8[AAD]: *"Gobi miyey gumowdaa?"*
Cabdisalaan Muuse X. I. Galaal, 28/4/2007
9[AAD]: *"Gobannimo lib weeyaan",*
Khadar Cali Gaas, London, UK, 28/4/2007
10[AAD] : *"Gobannimadu waa",*

Maxamed Xirsi Guuleed, Stockholm, Sweden, 29/4/2007

11 AAD : *"Weli gegida muu iman",*
Cabdisalaan Muuse X I Galaal, 30/4/2007

12 AAD : *"Sowmaynu garan"*,
Axmed Xuseen Ismaaciil, Jeddah, S.A., 30/4/2007

13 AAD : *"Maad garanin gobannimo",*
Sayid Maxamed Yuusuf "Dhegey", Stockholm, Sweden, 1/5/2007

14 AAD : *"Goosan baan la hayn weli",*
Siciid Saleebaan, MN, USA, 2/5/2007

maansooyinkan oo dhammi waxay ku dhigan yihiin degelka
http://www.somalilandfreedom.org